2011 ONTARIO BUDGET

Ontario

BACKGROUNDER

TURNING the CORNER TO A BETTER TOMORROW

MINISTRY of FINANCE

SHAN WAXYAABOOD OO AAD U BAAHAN TAHAY IN AAD KA OGAATID MIISAANIYADDA 2011

1. Dhaqaaluhu wuu soo wanaagsanaanayaa shaqooyinkuna way soo noqonayaan

- Ontario iyo bah wadaagta qaybaha gaarka loo leeyahay ee fikradaha cusub raaca waxay abuurayaan isla markaana hananayaan 10,000 oo shaqo oo loo marayo maalgelin cusub oo ka badan $1.3 bilyan, oo ay ku jirto ku dhowaad $175 malyuun oo ka imaanaysa dowladda Ontario
- Qorshaha Canshuurta Ontario ee loogu talogalay Shaqooyinka iyo Kobacu wuu shaqeynayaa. Ontario waxay dib u soo celisay boqolkiiba 91 shaqooyinkii ku lumay waqtigii hoos u dhicii dhaqaalaha
- Beeraleyda oo lagu caawinayo Barnaamijyo Maareyn Halis cusub oo la ballaraajiyey

2. Waxaan ilaalineynaa horukaca aan ka sameynay waxbarashada

- In ka badan 60,000 arday oo dheeraad ah ayaa geli doona kulliyadaha iyo jaamacadaha marka la gaaro 2015-16
- Iskuul xannaano oo maalintii oo dhan ah ayaa ka billaaban doona in ka badan 200 iskuul markay tahay Sebtembar 2011 isla markaana waxaa si buuxda loo hawl gelin doonaa Sebtembar 2014

3. Waxaan ilaalineynaa horukaca aan ka sameynay daryeelka caafimaadka

- 90,000 oo baartiaanno kansarka naasaha oo dheeraad ah, barnaamijka waa la ballaarinayaa si uu u gaaro haweenka da'doodu tahay 30-49 ee halista sare ugu jira isla markaana waxaa la taageerayaa baaritaanno dheeraad ah oo loogu talogalay haweenka da'doodu tahay 50-69.
- Istaraatiijiyad Caafimaad Maskaxeed iyo Qabatin Maandooriye oo baaxad weyn, oo laga billaabayo carruurta iyo dhallinyarada
- Adeegyo iyo taageero farmashiye oo dheeraad ah oo loogu talogalay kuwa daawada ku qaata Barnaamijka Manfaca Daawada Onatario, oo ay ku jiraan waayeelku

4. Waxaan dib u cusbooneysiineynaa abbaarsigeenna baabi'inta hoos u dhaca dhaqaalaha

- Hoos u dhaca dhaqaalaha ee 2010-11 waxaa hadda lagu qiyaasayaa $3 bilyan in uu ka hooseeyo saadaalintii sanad ka hor
- Kharashka barnaamijyada 2010-11 waxaa lagu qiyaasay in uu noqdo $2.6 bilyan mid ka hooseeya saadaalintii miisaaniyaddii sanadkii hore
- Waxaan qeexnay kaydinta ku dhowaad $1.5 bilyan oo loo qorsheeyey saddexda sanadood ee soo socota
- Tusaale ahaan, hay'adaha waaweyn waxaa laga codsaday in ay la yimaadaan kaydinta $200 malyuun marka ay tahay 2013-14
- Maalgelinta xafiisyada fulinta ee kuwa qaata lacago si gaar ah loogu xawilo waxaa hoos loo dhigi doonaa boqolkiiba 10 muddo labo sanadood ah. Tani waxay sidoo kale ku dabbaqmi doontaa hay'adaha waaweyn ee dowladda
- Cabbirka Adeegga Dadweynaha Ontario (Ontario Public Service (OPS)) waxaa mar kale hoos loo dhigi doonaa 1,500 jago inta u dhexeysa Abriil 2012 iyo Maarso 2014. Tani waxay dheeraad ku tahay hoos u dhiggii qiyaastii 3,400 shaqaale OPS ee looga dhawaaqay Miisaniyaddii 2009
- Guddiga loo saaray Dib u Qaabeynta lagu sameynayo Adeegyada Dadweynaha ee Ontario, ee uu madaxda ka yahay dhaqaaleyahanka la ixtiraamo ee Don Drummond, ayaa talo ka soo bixin doona isbeddellada naga caawin kara dardar gelinta qorshaheenna aan ku baabi'ineyno hoos u dhaca dhaqaalaha iyadoo welibana aan ilaalineyno daryeelka caafimaadka iyo waxbarashada

5. Waxaan baabi'in doonnaa hoos u dhaca dhaqaalaha iyadoo welibana aan ilaalineyno adeegyada dadweynaha ee muhiimka ah iyo koboca dhaqaalaha

Mucaamalaadka kale, sida hoos u dhigidda HST, waxay u baahan doontaa lacago fara badan oo laga jaro waxbarashada iyo daryeelka caafimaadka, taasoo dhaawici doonta qoysaska Onatario iyo dhaqaalahaba

ILAALINTA WAXBARASHADA

Iskuul Xannaano oo Maalintii oo Dhan ah

- ☑ Sebtembar 2011 gudaheeda, iskuul xannaano carruur oo maalintii oo dhan ah ayaa laga heli doonaa 200 iskuul oo dheeraad ah, kaasoo u faa'iideyn doona ilaa iyo 50,000 oo carruur ah.
- ☑ Hadda waxaa laqa helaa ku dhowaad 600 oo iskuul waxaana dhigta ilaa iyo 35,000 oo carruur ah.
- ☑ Barnaamijka waxaa si buuxda looga hawl gelin doonaa dugsi hoose oo kasta marka ay tahay Sebtembar 2014, isagoo u faa'iideynaya qiyaastii 247,000 oo carruur ah iyo qoysaskooda.

Boosas badan oo Kulliyadaha iyo Jaamacdaaha laga helo

- ☑ In ka badan 60,000 oo boosas arday cusub ayaa laga heli doonaa kulliyadaha iyo jaamacadaha Ontario marka la gaaro 2015–16.
- ☑ Arday kasta oo Ontario ku nool oo u qalma meel ayuu ka heli doonaa.

ILAALINTA DARYEELKA CAAFIMAADKA

Baaritaanno badan oo Kansar Naasaha ah

- ☑ Baaritaanno 90,000 kansar naasood oo dheeraad ah.
- ☑ Ballaarinta barnaamijyada baaritaanka si loo gaarsiiyo haween badan iyo kuwa halista sare ugu jira cudurka.

Istaraatiijiyad Caafimaad Maskaxeed

- ☑ Dowladdu waxay maalgelineysaa Istaraatiijyad Caafimaad Maskaxeed iyo Qabatin Maandooriye oo baaxad weyn, iyadoo ka billaabaysa carruurta iyo dhallinyarada.
- ☑ Abuuridda hab wadajira oo in badanna jawaab mirodhal ah bixiya.

Ballaarinta Adeegyada Farmashiyeyaasha

- ☑ Ballaarinta adeegyada farmashiyeyaasha iyo taageero loogu talogalay dadka hela Barnaamijka Manfaca Daawada Ontario — iyadoo lagu caawinayo waayeelka iyo kuwa kale ee ay haystaan arrimaha sida kala talin raadraaca daawo loo qoray.

www.ontario.ca/budget